Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo

**JAMHUURIYADDA** **SOMALILAND**

# FAAFINTA RASMIGA AH

**SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE**

ألنَّشرة الرَّسمية لجمهورية صوماليلاند

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA, MADAXTOOYADDA JSL, HARGEYSA,**

*E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com*

| Sanadka: 1aad | Cadadka: 11aad ee November | Taariikh: 01/12/2012 |
|---|---|---|

**QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.**

**RUKUNKA (Subscription):**

*QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.*

## TUSMADA CADADKA

**<u>*QAYBTA KOWAAD*</u>: XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:**

*SOOMA BIXIN*

**<u>*QAYBTA LABAAD*</u>: XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:**

*SOOMA BIXIN*

**<u>*QAYBTA SADEXAAD*</u>: DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM**

*SOOMA BIXIN*

**<u>QAYBTA AFRAAD:</u> AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**

1) **Amar Xayiraad Dhul. 01/11/2012** — **441**

| | |
|---|---|
| 2) **Amar Xayiraad Beer. 06/11/2012** | **443** |
| 3) **Amar Xayiraad Dhul. 07/11/2012** | **444** |
| 4) **Amar Xayiraad Guri. 19/11/2012** | **446** |
| 5) **Amar Xayiraad Dhul. 20/11/2012** | **449** |
| 6) **Amar Xayiraad. 24/11/2012** | **451** |
| **QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA** | |
| 7) ***Baafin Eedaysane. 10/11/2012*** | **452** |
| 8) ***Baafin. 15/11/2012*** | **453** |

# QAYBTA AFRAAD:
# AMARADA & GO'AANADA MAAMUL
# JAMUURIYADA SOMALILAND

# MAXKAMDA GOBOLKA HARGEYSA

MDH/DML/34/2008 DATE: 01/11/2012

**Ku: Taliyaha Saldhiga Booliska M/Mooge..............................=Hargeysa=**

**Ku: Idaacada Radio Hargeysa ............................................. =Hargeysa=**

**Ku: Jaraa'idka Madax Banan ee Dalka................................=Hargeysa=**

**Ku: Talliyaha Qeybta Bariga Hargeysa .............................. =Hargeysa=**

**Ku: Duqa Caasimada JSL .................................................. =Hargeysa=**

**OG: Wakiilu Dacwe Ibraahim Cabdi Dhiif ...........................=Hargeysa=**

**OG: Dacweysane Xuseen Dhiif Maxamuud ..................... =Hargeysa=**

## UJeedo: Amar Xayiraad Dhul Cabirkiisu yahay 500X250Mt.

Maxkamada Gobolka Maroodi Jeex iyadoo tixraacaysa qoraalka ku taarikhaysan 30/10/2012, ujeedadeeduna tahay Codsi Xayiraadeed oo waafaqsan Qodobka 294 XHM, ee dhulka Cabirkiisu yahay 500X250Mt ee ku yaala Degmada M/Mooge Xaafada Masalaha bari Jahooyinkiisuna hoos ku qoran yihiin. ee uu Maxkamada u soo gudbiyey Wakiilka Dacwooodayaasha Wakiil Ibaraahim Cabdi Dhiif

Hadaba Maxkamada Gobolka Maroodi Jeex waxay Xayirtay dhulka cabirkiisu yahay 500X250Mt ee Jihooyinkiisuna kala yihiin sidan

- ✓ Waqooyi…………………………… Waddada tagi jirtay Bandar Wanaag
- ✓ Barri……………………………….. Dhulka ilma Saqafaale
- ✓ Koon fur……………………….. Dhulka Ilma Saqafaale
- ✓ Galbeed………………………….. Dhulka Ilma Saqafaale

Dhulkaas oo ku yaala Degmada M/Mooge Xaafada Masalaha bari, iyadoo Maxkamadu hab raacaysa Qodobada 293, 294, 295 XHM.

Sidaas Darteed lama dhisi karo, lama iibin karo lama rahmi karo, lama Hibayn karo, sifo kalana looma isticmaali karo, ilaa inta amar danbe ka soo baxaayo Maxkamada Gobolka Maroodi Jeex

***((DR: Xuseen Mohamed Jaamac))***

***Garsooraha Maxkamada Gobolka Hargeysa***

***By: Mustafe Mohamed Ibraahim***

***Kaaliyaha Maxkamada Gobolka Hargeysa***

# JAMHUURIYADA SOOMAALILAND

# <u>MAXKAMADA GOBOLKA HARGAYSA.</u>

*MGH/DML/101/2012.* DATE: 06/11/2012

***Ku: - Taliyaha Qaybta Booliska Bariga =Hargaysa=***

***Ku: - Taliyaha Saldhiga Booliska daara salaam =Hargaysa=***

***Ku: - Guddoomiyaha Degmada daarasalaam =Hargaysa=***

***Og: - Dacwoode: - Cali Aadan Cige =Hargaysa=***

***Og: - dacweysane: - Maxamed Aadan Jaamac =Hargaysa=***

***Ujeedo: - Amar Xayiraad beerta cibirkiisu 1671 isku wareeg***

Maxkamadda Gobolka Hargaysa waxay Xayiray beerta cibirkeedu sare ku qoran yahey, ee ku taala Degmada daarasalaam, jihooyinkiisuna kala yihiin siddan,

Waqooyi, …………………………………………. xaaji cabdi giire

Koonfur ……………………………………….. Aadan Cali cige

Galbeedna ……………………………………. Yuusuf Cali banjawe iyo ilma cilmi

Bari ………………………………………………. Waddo

Sidaa darted waxay Maxkamaddu idinku amraysaa in aan beertaas la dhisi Karin, la iibin Karin, la rahmi Karin, Sifo kalena aan loo isticmaali Karin, cidii dhistana ay maxkamada horkeenaan sharciga

maxkamadu waxay u cuskatay Amarkan xayiraada ah Qodobadda kala ah 293, 294, 295 XHM.

**ALLAA MAHAD LEH.**

***((SH. AXMED AADAN MIRE))***

***MAXKAMADDA GOBOLKA HARGAYSA.***

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**MAXKAMADDA SARE**

**Supreme Court** المحكمة العليا

---

MS/DC/012

Ku:-Taliyaha Saldhiga Booliska Gacan Libaax 07/11/012

Ku:-Degmadda Gacan Libaax
Ku:-Idaacada Raadiyaw Hargeysa
Ku:-Jaraaidka Madaxa Banaan

Og:-Taliyaha Qaybta Booliska Bariga

Rafcaale:-Sahra Muxumad Bahdoon Degen Hargeysa

Rafcaansane:-canab cawaale C/laahi

Xasan “““““““” “”” Degen Hargeysa

**Ujeedo: - Amar Xayiraad Dhul cabirkisu dhan yahay 10x18 Mt jihooyinkiisuna kala yihiin**

Bari:-wado, Galbeed wado, Waqooyi dhisme, Koonfur Dhisme

Markuu Arakay:-Codsiga xayiraada ee Uu maxkamadd usoo qoray Sahra Maxamed Bahdoon ee ku taariikhaysan 01/11/012, kuna sheegay in loo xayiro dhulkii ay dacwadu ka socotay oo uu dhisanayo sida uu sheegay dhinaca Rafcaanluhu

Maxakamaddu waxay u cuskatay Amarkeedan Xayiraada Qodabadan:-294-295 296 XHM

1)Waxay amartay in aan la dhisi kari,la iibin Karin,la hibayn Karin,si kalena loo isticmaali Karin,dhulka cabirkiisa iyo tilmaantiisu ujeedada ku xusan,Degmadda Gacan Libaax Xaafada Sheekh Mubaarak ,

2) Waxaa la farayaa Talyaha Saldhiga Xaafada Sheekh Mubaarak cidii jabisa xayiraada Maxakamadda in lagu soo oogo danbiga amar diido Maxkamaddeed kuna Xusan Qod:-308 XCG, dhinac yada waxaa la farayaa in ay dhawraan awaamiirta kor ku sheegan,

(Dr, Yuusuf Ismaaciil Cali)

Garsooraha Maxkamadda Sare Ee J, S,

# JAMUURIYADA SOMALILAND

# MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

MRH/RML/103/012 Date: 19/11/2012

**Ku: Taliyaha Saldhiga New Hargeysa**

**Ku: Radio Hargeysa**

**Ku:Dhamaan Wargeysyada Madax Banaan iyo Kuwa Dawlada**

**Ku: Taliyaha Qaybta Bariga Hargaysa**

**OG: Garyaqaanka Guud Ee Qaranka JSL**

**OG: Racfaanle: Max,uud Axmed Xirsi**

**Qareen u yahay: Bshiir Xuseen Cabdi**

**OG: Racfaansane: Axmed Max,ed Ismacil Cawad**

**Qareen u yahay: Max,ed Jaamac Cabdi**

## UJeedo: Amar Xayiraad Guri .

**Markay aragtay**: - Galdacwadeedka Racfaanka Madaniga Ah ee Lr. MRH/RML/130/12 kana Dhexeeye dhinacyada sare ku xusan

**Marky aragtay**: - Codsiga Qarenka R/Sane Qareen Max,ed

Jaamac Cabdi ee ku Taariikhaysan

05/11/2012 KUNA Codsanaayo in loo

Xayiro Guriga ku Yaala kana mid Hotel

Mubaarik.

**Markay aragta**: - Qodobada 292,293,294 XHM, waxay

Xayiraad saartay qal ka mid ah guriga

Mububaarig hoteel qolkiisa woqooyi bari

Barri...................................... waa Dhisme

Waqooyi................................ waa Waddo

Koon Fur.............................. waa isla fooqa

Mubarik hotel

Sidaas darteed waxa la amaryaa taliyaha qaybta Bari iyo Taliyaha Saldhiga New hargaysa in aad Xayiraad saartaan Guriga halka Hola ee ka mid ah Huteel Muwaarik Qolkaas oo kaga yaala koonaha waqooyi bari.

Waxaana wada tagaaya xayiraada booliska iyo kaaliyaha Maxkmada Rcafaanka Gobolka Hargaysa ee Hoos ku xusan Si Loo Soo Hubiyo wixii Dhaxyaala Qolkan la Xayiraayo Kaaliyaha ayaanad ka wada Soconaysaan

Allaa mahad leh.

(Sahal C/lahi Xirsi)

Garsooraha Maxkamada Racfaanka Gobolka maroodi jeex

=Hargaysa=

C/qaadir Mux'ed Xuseen

Kaaliyaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka maroodi jeex.

# JAMHUURIYADA SOOMALILAND

# MAXKAMADA RAFCAANKA GOBOLKA HARGAYSA

## APPEAL COURT OF HARGEISA

**MRGH/ /2012 Date: - 20/11/2012.**

***KU: - Taliyaha Qaybta Booliska Bariga Hargaysa***

***KU: - Taliyaha Saldhiga Booliska Daloodho Hargaysa***

***KU: - Gudoomiyaha Degmada 26juun Hargaysa***

***OG: - Ibrahim Max'ed Max'ud Hargaysa***

***OG: - Dacwaysane:- Xuseen Yuusuf jaamac Hargaysa***

***OG: - Qareen Foosi sh. Yoonis Hargaysa***

***OG: - Soo Dhexgalayaal C/raxmaan Xuseen Nuur***

***Xasan Xuseen Nuur***

## *Ujeedo:- AMAR XAYIRAAD DHULKA CABIRKIISU YAHAY 80 x80MT.*

**M**axkamadda Rafcaanka Gobolka Hargaysa iyada oo tix raacaysa Amarka Xayiraad ka qaadis dhulka cabirkiisu sare ku xusan yahay ee sumadiisu tahay MGH/DML/202/2012 Ee 14/11/2012.

**S**idoo kalena tix raacaysa qoraalka cabashada ah ee uu Maxkamadda Rafcaanka u soo gudbiyay cabte

Qareen Abiib Cumar Abiib, kagana cabanayoAmarka xayiraad ka qaadista ah ee sare ku xusan.

Sidaa darteed Maxkamaddu Rafcanku waxay Xayiraad saartey dhulka cabirkiisu sare ku xusan yahay jihooyinkiisuna kala yihiin Waqooyi- wado, Koonfur- Waddo, Galbeed---Dhisme , Bari- Dhisme , **dhulkaasi la rahmi Karo, lana iibin Karin, lana badali Karin sifo kalena loo isticmaali Karin , ilaa inta dacwadani ka dhamaanayso Maxkamaddaha si Waafaqsan Qodobada 293-294-295XHM.**

Wa bilaahi tawfiiq.

Wada shaqayn wacan

***C/raxmaan jaamac Hayaan***

***Gudoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Hargaysa.***

***=Hargaysa=***

# JAMHUURIYADDA SOMAALILAND
# <u>Maxkamadda gobolka Hargaysa</u>

MGH/DML/133/2012 Hargeysa. 24/11/2012

***KU: -Taliyaha Saldhiga booliska Iftin Hargeysa Hargaysa.***
***KU: -Radio Hargaysa Hargaysa.***
***KU: -Jaraa'idka Madaxa Bannan ee Dalka JSL Hargaysa.***
***Og: -Taliyaha Qaybta Booliiska Galbeedka Hargaysa Hargaysa.***
***Og: -Guddomiyaha Degmada Axmed Dhagax Hargaysa.***
***Og: -Garyaqaanka Guud EeQaranka JSL Hargaysa.***

**Ujeedo: - <u>Amar Xayiraad</u>**

Maxkamadda Gobolka Hargaysa Waxay Xayiraysaa Hangarka iyo dhismaha qabyada ah ee Hangarka Galbeedkiisa ka socda ee Agagaarka Inji cabirkiisuna yahay dhan yahay 45X30Mt jihooyinkiisuna kala yihiin.
W/koonfur ====Dhisme, Bari ===Sariibada Inji,
Galbeed=== wado.

Waxaa kaloo ay xayirtay dhamman dhiska ka socda hortiisa dhinaca galbeed inaan la dhisi Karin la iibin Karin la rahmi karinsifo kale oo sharci ahna loo isticmaali Karin ilaa amar danbe maxkamadda ka Soo baxayo.
Waxaa xayiraadan loo cuskaday Qodobada 293,294.295, XHM

***<u>Allaa Mahad leh</u>***

***((Dr. Yuusuf Dalal Cabdi))***

***Garsooraha Maxkamada Gobolka Hargaysa.***

# OGEYSIISYADA

## JAMHUURIYADA SOMALILAND

## MAXKAMDA GOBOLKA HARGAYSA

**MGH/DDL/943/2012 Date: - 10/11/2012**

**KU: - Idaacada Radio Hargaysa**

**KU: - Jornaalka Madax Banaan**

**Uj: - Baafin Eedaysane (Safiya Cumar Cilmi)**

Maxakamda gobolka hagaysa waxay baafinaysaa Eedaysanta ujeedada sare u xusan taasi oo ay dacwda ay Eedaysan tahay taalo maxkamda gobolka hargaysa.

Sidaas dardeed waxa la faryaa idaacda radio hagaysa in ay no baafiso Eedaysanta mudo 7 casho ah.

Allaa Mahad Leh

**(Xasan Axmed Nuur)**

**Garsoorah Maxkamda Gobolka Hargaysa**

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**MAXKAMADDA SARE**

**Supreme Court** المحكمة العليا

MS/ I/DC/012 15/11/012

Ku:-Idaaacada Raadiyaw Hargeysa

Ku:-Jaraa, idka Madaxa Banaan

# Ujeedo:-Baafin

*Maxakamadda Sare Ee waxay ku war galinaysaa in ay dhaqaajiyaan dadka dacwadaha ka yimaada Gudida dacwadaha dhulka in ku soo bixiyaan fiiga kiisaskooda ku waajibay ee ay uga soo anbiil qaateen Maxkamadda sare. Dadkaas oo magacyadoodu kala yihiin*

1. Luul Aadan Diiriye
   Wakiil:-Hibo Aadan Diiriye

2. C/laahi Muxumad Daahir
   Maxamed Yuusuf Cabdi

3. Muxumad Yuusuf Odawaa

Hadaba hadii ay dadkaasi ku soo bixin waayaan fiiga Maxkamadda waxaa laga qaadi doonaa talaabo sharciga waafaqsan oo la xidhiidha arintooda

**Wa Bilaahi tawfiiq**

(DR, YUUSUF ISMAACIIL CALI)

GUDOOMIYAHA MAXAKAMADDA SARE EE J,S,L